AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Sharciyada Australia

Australia waa mujtamac dhaqano-badan oo soo-galootigu ka yimaado asalo dhaqano iyo diimo badan oo kala duwan ah. Dadka Australia waxay leeyihiin qiyam guud iyo xeerar ayaga mideeya. **Waxay ku-wada nool yihiin shuruuc isla mid ah.** Diimo iyo dhaqano kala duwan ayaa ku-wada-jira nadaam sharciyeed cilmaani ah ee waddanka. Dhammaan dadka Australia waxay leeyihiin xaqa inay caddeeyaan dhaqankooda iyo caqiidooyinkooda. Isla markaas cid kastaa waxaa laga filayaa inay ilaaliso xeerarkaas iyo qiyamkaas la wadaago iyo xorriyadda taageerta hab nololeedka Australia.

Qiyamkan la wadaago waxaa ka mid ah:

- xorriyatul qowl
- xorriyadda ururka
- xorriyadda kulmidda
- xorriyadda diinta
- xorriyadda dhaqdhaqaaqa
- ixtiraamka xorriyadda iyo sharafta shaqsiga
- ballan-qaadka sarraynta sharciga
- diimooqaraadiyadda baarlamaanka
- u-sinnaanta fursadaha ee shaqsiyaadka oo dhan, ayadoon loo eegayn jinsiga, waddankii asalka, diinta ama asalka, diinta ama asalka qawmiyada
- aqbalidda kala-duwanaanta dhaqanka
- Xamaasadda sinnaanta taas oo rumaysan is-ixtiraamka, caddaalladda iyo u-naxariista kuwa baahida qaba.

## La-macaamilidda saraakiisha dowladda

Markii aad Australia timaaddo, waxaad la tacaamulaysaa saraakiil ka socota adeegyada dowladda. Saraakiishaas waxaa xira xeerar adag inay u bixiyaan adeegyada si xirfad-yaqaanimo iyo caddaallad ah. Ha siinin sarkaal wax lacag ah, adoo u malaynaya inaad ka heli doonto adeeg fiican markaad sameyso sidaas. Taasi sharciga ayey ka soo-horjeeddaa. Siinta lacagta ama laaluushka oo nooc kasta ah wuxuu keeni karaa fal dambiyeed in lagugu qaado.

## Booliiska Australia

Booliiska Australia waa shaqaale dowladeed, oo gacan ka gaysanaya inay ilaaliyaan nabadgelyada ayna horumariyaan ammaanka bulshada dhexdeeda. Dowlad-goboleed iyo teritoori kastaa waxay leedahay ciidankeeda booliiska iyo Booliiska Federaalka Australia waa booliiska qaranka. Sharcigu waa kala duwan yahay dowlad-goboleed iyo teritoori kasta. Booliisku waxay ka-hortagaan oo baaraan dambiga, nolosha iyo hantidana way ilaaliyaan waxayna fuliyaan sharciga dambiyada. Ciidanka booliiska Australia maahan qayb ka mid ah milatariga. Waa inaadan ka baqin booliiska halkan Australia, hase ahaatee xusuusnow inaad ixtiraamto oo dhagaysato oo aad raacdo tilmaamahooda mar kasta.

## Sharciyada Australia

Sharciyada Australia waxay khuseeyaan muwaadiniinta iyo daganeyaasha Australia. Nadaamka caddaallada Australia waana ka madaxbannaan yahay dowladda. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sharciyada Australia, waa inaad hubisaa inaad weydiiso qofka caseworker-kaaga ama proposer-kaaga ah si ay kaaga caawiyaan inaad si sax ah u fahamto sida sharciyadu adiga iyo qoyskaaga idiin khuseeyaan. Mid ka mid ah sababaha ay sharciyadu u-jiraan waa in adiga iyo qoyskaaga la siiyo ammaan. Garashada sharciyada asaasiga qaarkood waxay kaa caawin doontaa inaad la qabsato noloshaada cusub halkan Australia.

## Sinnaanta iyo sharciga

Halkan Australia dhammaan dadku way u siman yihiin sharciga hortiisa. Dhammaan dadka Australia waxay leeyihiin xaqa in la ixtiraamo oo loola dhaqmo si caddaallad iyo sinnaan ah. Taasi waxay khuseysaa shaqo-helidda, waxbarashada, hooyga, xorriyadda diinta (ayadoo la raacayo sharciyada Australia), gadashada alaabta, helitaanka adeegyada sida dhaqaatiirta, bangiyada iyo hoteellada, iyo xabsiga ama xiridda xukunka. Qofna loolama dhaqmi karo si ka-duwaan ah sababtoo ah:

- jinsigooda
- Sinjigooda/qawmiyadooda
- waddankii asalkooda
- da’dooda
- xaalladda guurkooda
- uurkooda
- caqiidadooda siyaasadeed iyo diineed
- iintooda
- qaabka galmadooda.

## Diinta iyo sharciga

Australia malahan diin dowladeed rasmi ah ayadoo dhammaan dadka reer Australia ay xor u yihiin inay qaataan diintii kasta oo ay doonaan. Diimaha laga haysto Australia waxaa ka mid ah Kirishtaanka, Buudaha, Islaamka, Yuhuudda, Hindiga iyo kuwa kale oo badan. Dadku waxay ku dhaqmi karaan caadooyinka iyo xusaska diintooda maaddaama aysan ka horimaanayn sharciyada Australia. Sharciyada diineed laguma aqoonsana sharciga Australia kumana lahan wax maqam sharciyeed ah halkan Australia.

## Rabshadda iyo sharciga

Ku-kicidda fal ah rabsho oo lidi ku ah qof kale waa mid sharciga ka soo-horjeedda halkan Australia. Gacanqaadku waa dambi jariimo ah markaasna ciqaabaha ka yimaadaa way daran yihiin. Waa wax sharci darro ah in lagu noqdo rabshoole cid kasta – nin, haween, ilmo ama xubin qoyska ah.

## Rabshad guriyeedka iyo qoyseed

Dowladda Australia uma dulqadanayso rabshad guriyeedka iyo qoyseed duruuf kasta oo jirta. Rabshad guriyeedka iyo qoyseed waa jariimooyin ka soo-horjeedda sharciga. Qofkii ku kaca jariimooyinkaas wuxuu galayaa xabsi, ama ha ahaadeen nin ama naag. Rabshad guriyeedka iyo qoyseed waxaa ka mid ah akhlaaqda ama hanjabaadaha taas oo looga jeedo in lagu kontaroolo wadeey lab ama dheddig ah ama ilmo ayadoo loo-gaysanayo cabsiin ama loogu hanjabayo ammankooda ama ladnaantooda. Akhlaaqda ama hanjabaadda waxaa loo gaysan karaa waayeel, ilmo ama hanti waxaana ka mid ah dharbaaxada, garaacidda, ceejinta, u-diididda lacagta masruufka wadeyga ama xubnaha qoyska, gooni-ku-haynta wadeyga laga ilaaliyo saaxiibada iyo qoyska, cayda, caaridid joogto ah ama u-hanjabidda carruurta. Waxaa jira adeegyo xasaasiya dhaqan ahaan oo ka jira Australia oo ku caawin kara. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.1800RESPECT.org.au

## Ku-xadgudubka galamada

Halkan Australia, waa wax sharciga ka soo-horjeedda in cid kasta si galmo ah loogu xadgudbo. Qofkii ku kaca ku-xadgudub galmo wuxuu galayaa xabsiga, ha ahaado nin ama haween. Ku-xadgudubka galmadu waa ku-xadgudub jidheed oo leh qaab galmo. Waa wax loo gaysto qof kale, oo ay ka mid yihiin wadeyga, ama sowjka, ayadoo uusan jirin ogolaanshahooda. Ku-xadgudubka galmada waxaa ka mid ah qabsashada (xoogidda), ama ku qasbidda qof kale inuu galmo la yeesho ama la sameeyo fal galmo, ku-qasbidda qof kale inuu daawado ama ku-sameeyo pornography ama waa galmo la yeelashada ama la sameynta fal galmo ilmo yar. Waxaa jira adeegyo xasaasi u ah dhaqan ahaan halkan Australia oo ku caawin kara. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.1800RESPECT.org.au







## Ku-xadgudbidda ilmaha iyo sharciga

Sharciga Australia wuxuu carruurta ka ilaaliyaa xadgudubka ama rabshada. Xadgudubkan waxaa ka mid ah mid jidheed, nafsiyeed ama xadgubka galmada. Dhammaan noocyada ku-xadgudubka ilmaha waa dambi weyn Australia. Xaaladaha qaarkood, ilmaha uu ku dhaco xadgudubka waxaa ka qaadi karaa qoyskooda dowladda si loo ilaaliyo. Haddii aad ka warhesho in ilmuhu uu qabo rafaad iyo xadgudub, ama ay ka shakiyaan in ilmuhu uu ku rafaadsan yahay xadgudub, sharciga hortiisa, waa inay usoo-sheegaan booliiska.

Halkan Australia, lama ogola in carruurta lagu anshaxo ayadoo la-gubo ama aad loo garaaco. Waxaa muhiim ah in waalidiintu ay bartaan siyaabaha carruurtooda loo anshaxo ayadoo aysan jirin wax rabsho ah. Waalidiintu waxay ka heli karaan taageero dheeraad ah si ay u daryeelaan carruurtooda – saxiibadooda, xubnaha kale ee qoyska, xarumaha bulshada iyo xarumaha xannaanada ilmaha. Macluumaadka iyo talooyinka oo ku saabsan waalidnimada waxa laga heli karaa degmooyinka hoose, shaqaalaha bulshada, xirfad-yaqaannada la-talinta, kindhaha iyo dugsiyada iyo sidoo kale website-yada, sida Machadka Australia ee Daraasadaha Qoyska (Australian Institute of Family Studies). Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.aifs.gov.au

Waalidiintu waxay masuul ka yihiin daryeelka carruurtooda guriga dhexdiisa. In kastoo aysan jirin wax sharciyo ah oo sheegaya da'da ugu yar oo ilmaha gaaro loogana tegi karo keli ahaan guriga, waalidiintu waa inay hubiyaan ammaanka iyo ladnaanta carruurtooda.

## Mindiyaha, hubka iyo sharciga

Waxaa ka jira xeerar adag oo ku saabsan lahaanshaha qoryaha iyo hubka kale halkan Australia. Dadkii doonaya in halkan Australia, lahaadaan bundukhyadooda waa inay u leeyihiin laysan. Mindiyaha waxaa guud ahaan loo arkaa inay yihiin hub qatar ah waana ka sharci-darro in lagu haysto goobaha dadweynaha. Sharciyada iyo ciqaabuhu way u kala duwan yihiin dowlad-gobolledyada iyo teritooriyada kasta. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.ag.gov.au Iyo inaad baarto 'Crime and corruption' (dembi iyo musuqmaasuq).

## Guurka iyo sharciga

Halkan Australia, dadku waa u xor inay doortaan inay guursadaan. Badanaa, qofku waa inuu ka weyn yahay da'da 18 sano si uu si sharciyan ah u guursado. Duruufaha qaarkood qofkii ka weyn da'da 16 sano waa guursan karaa, hase ahaatee arintaasi waxay u baahan tahay amar maxkamadeed. Qofkii hore u guursadey ma guursan karo qof kale inay garoobaan ama si sharciyan isku furan mooyee. Guursashada wax ka badan hal qof isla mar qura waxaa loo yaqaan naago-badan-guursasho waxayna keeni kartaa xabsi.

Ku-qasbidda qof kasta in la guursado waa dami daran halkan Australia. Qofku waa inuu ogolaadaa guurka asagoon lagu qasbin ama lagu qiyaamin. Guurka laysku-doono, halkaas oo labada qof ay si xor ah u ogolaadeen inay is-guursadaan, waa ka duwan yahay guurka laysku-qasbo. Guurka laysku-doono, waa ka sharci halkan Australia. Waa wax sharci darro ah in qof loo qaado ama loo diro waddan kale si guur qasab ah ama in cid kale loo adeegsado si ay u qabato howshaas. Waxaa kaloo jirta oo in la ogaado ah in siinta yaradka aysan ka ahayn caado dhaqameed halakan Australia. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.1800RESPECT.org.au

## Galmada iyo sharciga

Da'da Sharciga ah ee Ogolaanshaha (da'da uu sharcigu ku aqoonsan yahay xuquuqda qofka si uu ogolaado inuu galmo la yeesho qof kale) way ukala duwan tahay dowlad-goboledyada halkan Australia. Taas waa 16 sano labka iyo dheddigaba dhammaan dowlad-goboledyada oo dhan marka laga reebo South Australia iyo Tasmania. Da'da ogolaasnhaha ee falka galmada oo u dhaxeeya laba wadey oo isku jinsi ah baa aad u sarreeya Queensland dhexdeeda. Waxaa jira ciqaabo culus oo lagu qaadayo cid kasta oo la-yeelata fal galmo qof ka yar da'da ogolaanshaha.










## Tubaakada, khamriga iyo sharciga

Sigaar-cabidda waa ka mamnuuc in lagu cabbo goobaha badan ee dadweynaha halkan Australia, oo ay ka midka yihiin madaarada, xafiisyada dowladda, iyo goobaha shaqada. Sigaar-cabidda lagu dhex-cabo maqaayadaha, baararka, naadiyada iyo xaruumaha dukaamada ayaduna waa ka mamnuuc badiba dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada. Waxaa kaloo sharci-darro ah in sigaarka lagu dhex-cabo baabuurta ay ku jiraan carruurta ka yar da'da 18 sano badiba dowlad-goboleedyada. Meelaha aan-sigaarka lagu cabbin waxaa badanaa lagu muujiyaa calaamad, hase ahaatee mar kasta maahan.

Waa arrin sharciga ka-soo-horjeedda in cid kastaa ka iibiso badeecadda tubaakada kurayada (taas oo ah, cid ka yar 18 sano jir). Siinta tubaakada kureyga waa ka mamnuuc badiba dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada.

Cabidda khamrigu waa ka sharci halkan Australia hase ahaatee keliya meelo cayiman iyo waqtiyo cayiman. Cabidda iyo iibinta khamrigu waa laga mamnuucay badiba meelaha dadweynaha. Waa wax sharciga ka soo-horjeeda in qof uu ka iibiyo ama u-keeno khamriga kureyga (qof ka yar da'da 18 sano). Waxaa kaloo sharciga ka-soo-horjeedda in kureygu uu ku dhex cabo khamriga marka laga reebo hantida-ma-guurtada oo gaarka ah sida guriga gaarka ah. In kastoo sharci ahaan loo ogol-yahay kureyga inuu ku cabbo khamriga guriga dhexdiisa, waxaa badanaa loo qaataa wax mujtamac ahaan aan la-aqbali karin marka loo eego ammaankooda iyo caafimaadkooda'. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg:

- www.quitnow.gov.au
- www.alcohol.gov.au

## Daroogooyinka iyo sharciga

In kastoo aan u aragno daroogooyinka qaarkood inay yihiin sharci kuwo kalena sharci-darro yihiin, daroogooyinka badidooda waxay u dhexeeyaan labada.. Waxyaalaha qaarkood waa sharci, hase ahaatee waxaa jira sharciyo xaniba isticmaalkooda ama iibkooda. Kuwo kalena waa sharci-darro in la isticmaalo, la-lahaado ama la-soo-saaro. Soo-dejinta ama keenidda daroogooyinka halkan Australia waa dambi jariimo ah ayadoo ciqaabaha ay ku jiraan waqti xabsi ah. Dambiyada kale waxaa ka mid ah lahaanshaha, beeridda, goosashada, iibinta ama isticmaalka daroogooyinka sharci-darada ah. Waxaa kaloo jira sharciyo mamnuucaya wadida baabuurka aydoo ay jirto saamaynta daroogooyinka waxaana jira istayshino baarista oo kala-sooc la'aan ah oo ay maamulaan booliiska oo sharci ahaan ku weydiin kara inaad geeska istaagto markaad baabuurka wadato si aad u bixiso samabalka candhuufta si loo baaro. Sharciyada iyo ciqaabuhu way ukala duwan yihiin mid kasta oo dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada ah. Taxadar waa in loo yeeshaa wadidda baabuurta ka dib qaadashada daroogooyinka dhaqtarku qoro. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.drugs.health.gov.au

## Khayaanada iyo sharciga

Macaamiisha waa inay mar kasta u-sheegaan macluumaad sax oo ku saabsan xaaladda qoyskooda iyo dakhligooda haya'daha dowladda sida Wasaaradda Adeegyada Bulshada (Department of Human Services) iyo Xafiiska Canshuuraha Australia (Australian Taxation Office). Waxaa jira ciqaabo ku saabsan u sheegidda haya'daha dowladda macluumaad marin-habaabin ah oo ay ka mid tahay waayidda lacagaha taageerada dakhliga iyo dib-u-siinta lacagtii dowladda.

## Gaarnimada iyo Sharciga

Australia waxay leedahay sharciyo ilaaliya gaarnimada shaqsiyaadka. Haya'daha dowladda waa inay raacaan sharciga gaarnimada (*Privacy Act 1988*) kaas oo sheegaya sida macluumaadkaaga shaqsiyeed loo kaydinayo, loo adeegsanayo ama loo qaadayo. Badiba haya'daha aan dowliga ahayn waxay leeyihiin caddaynta gaarnimada taas oo dadka u-sheegta sida macluumaadkooda shaqsiyadeed loo adeegsan karo. Haddii aad dareento inaadan jeclaysan sida macluumaadkaaga shaqsiyadeed loo adeegsaday waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Komisaariyaha Gaarnimada ee Federaalka (Office of the Federal Privacy Commissioner). Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.oaic.gov.au oo ka baar 'Australian Privacy Principles'.

## Gargaar sharci

Legal Aid waa adeeg sharciyeed oo ay maalgeliso dowladdu oo xafiisyo ku leh mid kasta oo dowlad-goboleed iyo taritoori ah. Waxay siisaa matalaad sharci kuwa aan awoodin inay iska bixiyaan looyarada gaarka ah, waxay kaloo siisaa talooyin sharciyeed iyo caawimaad. Haddii aad qabto cabasho sharciyeed, kala hadal qofka caseworker-kaaga ah wixii faahfahin xiriir ah ee xarunta Legal Aid Centre ee kuugu dhow. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.australia.gov.au/content/legal-aid

*Qaybta dib loo eegay (April 2018)*

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM